



Baratakoolka Dhegeysiga Maxkamadda Khadka ee SMC

Maxkamadda Magaalada Seattle waxay bixisa dhegeysiyo maxkamad fiidiyow ah ee WebEx iyo foomamka elektarooniga qareennada ee Adobe.

Baratakoolka Dhegeysiga Fiidiyowga

- Soo gal goor hore una dhaqan si ixtiraam leh, sidaa u dhaqmi lahayd dhegeysishaqsi
- Hadaad haysato kaamiro, daar inta lagu jiro dhegeysigaaga
- Ha hadlin adoon haysan oggolaanshaha garsooraha
- U dulqaado wixii dhibaato ah ee xagga teknoolajiyadda
- Garsooraha ayaa laga yaabaa inuu go'aansado inuu joojiyo ama uu sii wado dhegeysiga haddii tiknoolajiyaddu aysan ahayn mid shaqeynaysa inta lagu jiro dhageysiga

Ka-qeybqaadashada Dhegeysi La-duubayo

- Dhegeysiada fiidiyowga ah waa la duubaa. Si loo helo duubis faseex ah, waxaa muhiim ah hal qof inuu hadlo markiiba, walibo aad u hadashid si faseex ah
- Markaa hadleysid, marwalba magacaaga sheeg markakoobaad
- Iska xir makrafoonkaaga marka aadan hadleyn
- Isku day inaad hesho meel sharqan lahayn si aad ugu soo biirto dhagaysiga
- Ateenshin sii oo indhahaaga kuhay shaashadda
- Haddii hadlaha maqalkiisa dhib kajiro, hadlaha gacan taag ugu baaq. Haddii adoo hadlaya aad aragto calaamad joojin ah, jooji hadalka ilaa dhibka laga xallinaayo
- U sheeg diidmooyinka si cad adoo gacanta taagaaya
- Maxkamadda wey aamusin kartaa ka-qeybgale kasta oo carqaladayanaya dhegeysiga
- Haddii aad qabto su'aalo farsamo ama habraac, iimeelgaree
SMC_Adobe_Bailiffs@Seattle.gov kahor dhegeysigaaga ama weydii Bailiff-ka adoo isticmaalaya barta wadahadalka (chat) ee WebEx inta lagu jiro dhegeysiga
- Lama oggola duubis kasta oo fiidiyoow ah, duubitaan maqal ah, sawir qaadis, shaashadda sawir ka-qaadis ama dib-soo-saarlis maxkamadda tooska u-socota, ilaa aad fasax ka hesho garsooraha mooyee
- Daawadayaasha maxkamadda waa inay fiidiyowgooda iyo codka iska xiraan

Hab-dhaqannada ugu Fiican ee Xiriirka Khadkaaga Inta lagu guda jiro Dhegeysi

- Weydiiso dadka kale ee gurigaaga in aysan ku daawan Wifi-ga waxyaabaha sida muuyusiga, filimada ama ciyaaraha fiidiyowga maxaa yeelay tani waxay sii xumeyn kartaa khadkaaga
- Haddii ay suurogal tahay, isticmaal fiilo khad ah si aad ugu xирто kumbuyutarka/laptop-kaaga qalabka khadka gurigaaga si aad u hesho khad xawaare sare leh
- Demi Wifi-ga foonkaaga gacanta, oo laga yaabo inuu leeyahay barnaamijyo soconaya oo khadkaaga diciif ka dhigaya

- Hadday ku haysato dhibaato maqal ama muuqaal ah inta lagu jiro kulan ka socda WebEx, waxaa heli kartaa kulanku inuu ku soo waco. Guji "..."(doorar badan) oo sii guji "audio options." Geli foon lambarkaaga qeypta "Call me" oo dhag-sii "Switch." Kulanku si ootamaatik ah buu u soo wici doonaa foonkaaga

Maxaa WebEx?

Magaalada Seattle waxay u dooratay WebEx dhegeysiyada khadka sababtoo ah ammaankeeda iyo xog dhawristeeda:

- WebEx waxay si ootamaatiga u ilaalisaa xogta isticmaalaha, beddelka isticmaalayaashu xogtooda ka dhigi lahaayen wax la wadaago
- Cisco WebEx waxay si joogto ah u sameysaa baaritaanno xoog leh si lagu sii wado sharuudaha ammaanka ee muhiimkaa
- Dhammaan xiriirrada u dhexeeeya barnaamijta Cisco WebEx iyo khadka Cisco WebEx Cloud waxay maraan kannaalo xiran oo ammaan ah